Horten Kommune

Barnehagene

# Sababtee iyo sidee ayaa xanaanada caruurta Loogu xusaa diimana iyo dhaqamada Kala duwan?



# TUSMADA QORAALKA:

## Hordhac

**Qeybta 1: Dabbaqaadda Sharci iyo xeerarka la xiriira, Aragtida ay ku salaysan yihiin**

- Muxuu Sharciga xannaanada carruurta iyo qorshahiisacguud ka qabaa howlaha la xiriira dhaqanka iyo diimaha?
- Go'aamada qoran ee  dowladda hoose
- Erayada dabbaaldeg/xusid

**Qeybta 2: Caadoyinka iyo Ciidaha dugsiga xannaanada carruurta ee Horten**

- La shaqeynta waalidiinta
- Qaabka loo howlgelayo
- Qaar ka mid ah ciidaha/caadooyinka

**Casharkan hlaxaa soo diyariyay macalimada kashaqeysa Karljohansvern Barnehage Janne Tove Sandmo**

# HORDHAC

Dugsiga xannaanada carruurta waxay door muhiim ah ka qaataan barbaarinta iyo dhaqanka ilmaha.
dugsiga xannaanada carruurta waxa dhigta ilmo ka soo kala jeeda dhaqammo, diimo iyo mahdabo kala gedgeddisan. Waa muhiim in dhammaan ilmahaasi dareemaan in ay qeyb ka yihiin isla-markaana dhaqankoodu ka dhex muuqdo dugsiga xannaanada carruurta ee ay dhigtaan. Waxa iyana qasab ah in dugsiga xannaanada carruurtu ilmaha ku barbaariso in ay ixtiraamka carruurta kale iyo in aan la is takoorin.
Qorshaha guud ee howlaha dugsiga xannaanada carruurta, waxyaabaha ku qoran waxa ka mid ah «*In carruurtu la kulmaan dhaqamo iyo caadooyin kala gedgeddisan waxay keenaysaa in ay si xushmad leh u wada noolaadaan dadka dhaqamadda ka gedgeddisan leh. In ilmuha dhaqankiisa lagu beraarujiyo iyo in uu qeyb ka noqdo dad dhaqammo kale ka soo jeeda waxay kordhinaysaa in carruurtu fahmi karaan dadka dhaqamada kale leh.*»

Qorshaha guud ee howlaha dugsiga xannaanada carruurta waxa uu dhiirrigelinayaa in la xuso waqtiyada Ciidaha kala duduwan, arrintaas oo qeyb ka ah maaddada Diimaha, Filosufiyadda iyo Anshax wanaagga. Inta lagu jiro sannad dugsiyeedka dugsiga xannaanada carruurta waxaanu leenahay caadooyin iyo maalmo la xuso oo muujinaya dhaqanka Norweyjiga iyo dhaqammo iyo diimo kale oo ay ka soo jeedaan ilmaha dhigta dugsiga xannaanada carruurta. Intaas waxa dheer iyada oo aanu u xusno ayaamo caalamka muhiim u ah, sida maalinta qaramada midoobey.

Qoraalkani waxa uu ka hadlayaa howlaha waxbarasho ee ku saabsan Ciidaha laga xuso dugsiga xannaanada carruurta, ujeeddadiidsuna waxay tahay in uu shaqaalaha u noqdo Aalad shaqo, waalidiinta iyo ciddii kale ee danaynaysana u siiyo macluumaad.
Waxa uu wax ka sheegayaa qawaaniinta iyo talooyinka ku saabsan sababta aanu u xusno Ciidaha, qaabka loo xuso iyo xog dheeraad ah oo ku saabsan qaar ka mid ah ciidaha laga xusay ama badanaa laga xuso dugsiyada xannaanada carruurta ee Horten, Qoraalka waxa kale oo ku jira in yar oo ka mid ah howlaha laga wado dugsiga xannaanada carruurta ee la xiriira bashada dhaqanka iyo dhaqamada ka gedgeddisan. Waxa laga rabaa in dugsiga xannaanada carruurta iyo shaqaalahiisu ay ogaadaan diimaha iyo dhaqada ay kala wataan ilmaha dhigta dugsiga xannaanada carruurta, ka dibna ay xusaan ciidahooda iyaga oo la kaashanaya qoysaska carruurta.

Ujeedada qoraalkani waa in la isu sheego sida aanu u xusno caadooyinka iyo Ciidaha. Waxaanu rajeynaynaa in qoraalkani horseedowada hadal dhex mara waalidiinta iyo mas'uuliyiinta carruurta oo ku saabsan sida xusaskaasi u dhacayaa. Waxaanu doonaynaa in tani kordhiso fahamka la xiriira in aanay dugsiga xannaanada carruurta shaqadeedu ahayn mid la isku amrayo, ee ay doonayso in ay abuurto is xushmayn iyo is faham ku yimaadda xog isasiin.

# QEYBTA 1: DABBAQAADDA SHARCI IYO XEERARKA LA XIRIIRA, ARAGTIDA AY KU SALAYSAN YIHIIN

## MUXUU SHARCIGA XANNAANADA CARRUURTA IYO QORSHAHIISACGUUD KA QABAA HOWLAHA LA XIRIIRA DHAQANKA IYO DIIMAHA?

Sharciga xannaanada carruurta iyo qorshahiisacguud waxa uu qeexayaa hadafka iyo sida laga rabo in ay noqoto waxbarashada xannaanada carruurtu.
Xilka bulsho ee dugsiga xannaanada carruurtu waa in uu ilmaha soo koraya siiyo xannaano iyo goob waxbarasho oo ilmaha u wanaagsan.
Sharciga xannaanada carruurta iyo qorshaha guud ee howlaha xannaanada caruurta, labaduba waxay qeexayaan sida laga yeelayo dhaqamada kala duduwan. Waxyaabaha ay na farayaan dhanka xilka bulshada waxa ka mid ah: «*Dugsiga xannaanada carruurta waxa waajibaad bulsho ka saaranyahay in uu ka hortago is caayidda iyo is takoorka*». Waxa lagu nuux-nuux sanayaa in bulshada Norweyjigu ka kooban tahay dhaqammo kala duduwan, oo markaa ay jiraan siyaabo badan oo Norweyji loo ahaan karo. Ilmuhu marka ay dugsiga xannaanada carruurta soo galaan waxay wataan waayo-aragnimo iyo dhaqamo kala geddisan, dugsiga xannaanada carruurta ayay shaqadiisa tahay in uu taageero carruurta oo dhan «*iyada oo laga duulayo mid waliba dhaqanka iyo waxa uu wato*» (Rammeplan for barnehagens innhold og oppgaver, 2011, 2011).

Ujeeddooyinka sharciga xannaanada carruurta waxyaabaha ku qoran waxa ka mid ah:

«*Dugsiga xannaanada carruurta waxa uu ku salaysan yahay mabaadi'da asaasiga ah ee masiixiga iyo kuwo laga dhaxlay caadooyinka Aadamiga ah, sida ixtiraamka bani-Aadmiga og dabeecadda, xoriyadda caqliga, sadaqadda, cafiska, sinaanta iyo isu-damqashada, mabaadi' ka timid diimo iyo caqiidooyin kala ged-geddisan oo ku qeexan xaquuqul-insaanka. Dugsiga xannaanada carruurta waxa laga doonayaa in uu horumariyo sinaanta iyo dimuqraadiyadda, isla-markaana ka hortago is takoorka*»

Sharciga xannaanada carruurtu waxa uu iyana ku nuux-nuuxsanayaa xilka gaar ahaaneed ee dugsiga ka saaran carruurta ka soo jeedda qowmiyadda Saammaha in lagu taageero sidii ay ugu barbaari



lahaayeen dhaqanka iyo afkooda. Qorshaha guud waxa uu sii tilmaamayaa in carruurta Saammaha ahi ay u baahan yihiin in gacan laga siiyo sidii ay u baran lahaayeen isla-markaana u haynsan lahaayeen luqaddooda iyo dhaqankooda meeshii ay doonaan waddanka ha ka joogaane. Carruurta Saammaha iyo waalidiintoodu waxay xaq u leeyihiin in ay shaqaalaha dugsiga xannaanada carruurta ka fishaan kuwo yaqaana isla-markaana muhiimad siinaya in dhaqanka qowmiyadda Saammuhu qeyb ka yahay waxyaabaha lagu barto dugsiga xannaanada carruutrta.



Maaddada Bey'adda iyo bulshada, waxay ka hadlaysaa in dugsiga xannaanada carruurtu wax ka qabto sidii ay ilmuhu nolosha ka baxsan qoyskooda ugu wajihi lahaayeen kalsooni iyo dhiiranaan., si'ay ilmuhu u helaan aqoon ku saabsan dhaqammo iyo qaab-nololeedyo kala ged-geddisan. Shaqaalaha waxa laga doonayaa in ay suurogeliyaa kobcinta fahmadda carruurta ee la xiriirta dhaqamada kala duwanaanshahooda iyo isu-ekaanshahoodaba, iyo in ay ka shaqeeyaan sidii dugsigu u noqon lahaa bey'ad ka hortagta cunsuriyadda iyo is caayidda. Maaddadan waxa iyana ku jira hadaf la xiriira in carruurtu bartaan dhaqanka qowmiyadda Saammaha iyo nolol-maalmoodkooda.

Maaddada Anshaxa, diinta iyo ffilosufiyaddu waxay ka hadlaysaa waxyaabaha lagu baranayo dugsiga xannaanada carruurta. «*Anshaxa, diinta iyo filosufiyaddu iyaga ayaa qaabeeya aragtida dadka iyo mabaadi'dooda waxayna doorweyn ka qaataan mabaadi'da dadka iyo waxa ay rumaysan yihiin. Diinta iyo aragtida noloshu waxay gundhig u yihiin xeerarka anshaxa. Diinta masiixiga iyo mabaadi'da Aadamiga ah boqollaal sano ayaa Yurub lagaga dhaqmayey. Norway waqtigan xaadirka ah waa bulsho leh dhaqammo iyo diimo kala ged-geddisan. Dugsiga xannaanada carruurta waa in ay ka muuqataa oo uu xishmeeyaa dhaqamada isku-dhafan ee carruurta dugsiga dhigata, iyada oo isla markaana aan laga tegeyn mabaadi'da masiixiga iyo kuwa laga dhaxlay caadooyinka Aadamiga. Anshaxa uu dugsiga xannaanada carruurtu ilmaha barayo waa in loo eego hadba ilmuhu meesha uu ka soo jeedo iyo dhaqanka iyo diinta gurigiisa taal ama mabaadi'da laga aaminsan yahay.*»

Iyada oo la adeegsanayo anshaxa, diinta iyo filosufiyadda, waxa dugsiga xannaanada

carruurta laga doonayaa in ay ilmaha u sahlaan in ay:

- ogaadaan in waxyaabaha asaasiga ahi qiimo leeyihiin, iyada fursad iyo xasillooni loo siinayo in ilmuhu wax u fiirsado kana fekero, wada hadal iyo sheekooyinba
- bartaan mabaadi'da asaasiga ah ee bulshada iyo xeerarkeeda
- ku barbaaraan xushmadda iyo wada-noolaanshaha dadka, diimo iyo dhaqamo ama aragtiyo kala duwanba ha haystaane
- helaan xogta mabaadi'da asaasiga ah ee masiixiga iyo kuwa laga dhaxlay caadooyinka Aadamiga iyo doorka ay ku leeyihiin dhaqanka waddankan
- wax ka ogaadaan ciidaha masiixiga iyo caadooyinka ku saabsan ciidaha ay leeyihiin diimaha iyo caqiidooyinka kale ee carrurta dugsiga la dhigata
- la baro anshaxa, diinta iyo filosufiyadda taas oo qeyb ka ah dhaqanka iyo bulshada

Si loogu dhaqaaqo dhanka ahdaaftaas waa in ay shaqaaluhu

- qaddariyaan oo xushmeeyaan carruurta su'aalahooda, fikirkooda iyo waxa ay aaminsan yihiin
- abuuraan jawi waxbarasho, fikir iyo dib-u-eegis iyo wada sheekaysi fiican
- ku booriyaan carruurta xiisaha iyo dhiirrigelinta fahamka iyo tixgelinta wada-noolaashaha dhaqamada iyo qaab-nololeedyada ka ged-geddisan
- ku baraarugsanaadaan mansabka ay shaqaaluhu carruurta ugu muuqdaan, isla markaana yeeshaan hab-dhaqan carruurta ku dhiirrigeliya cidda ay yihiin iyo is xushmaynta dhexdooda.
- muujiyaan dhaqanka laga dhaxlay masiixiyadda iyada oo la xusayociidahiisa, iyo in la xuso caadooyinka diimaha kale, caqiidooyinka iyo dhaqamada ay haystaan ilmaha xannaanada dhigata oo dhan

## GO'AAMADA QORAN EE DOWLADDA HOOSE

Kaniisadda Norweyjigu waxay carruurta da'doodu saddex jir gaarto ku martiqaaddaa in ay ka qaybgalaan safarka xilliyo-diimeedyada Christmast-ka iyo Easter-ka, iyo cibaadeysiga la xiriira xilli-diimeedka pinse-ha (Pentecost) ee carruurta Iskuulka bilaabaysa.
Dusiga xannaanada carruurtu waxa uu leeyahay nidaam diiwaangelineed oo ay arrimahaas u maraan . Golaha looga taliyo dowladda hoose ee Horten waxa ay 27.02.2012 soo saareen go'aan qoraal ah oo lagu caddaynayo in marka dugsi xanaano oo dowladda hoose leedahay ka qaybqaadanayo kulamo ay soo qabanqaabiyeen dad diin ama caqiidooyin gaar ah leh, waa in carruurta ka qaybgelaysaa noqotaa kuwo waalidkood diiwaangeliyeen. Carruurta aan ka qaybgelaynin kulamadaas waa in ay xilliyadaas helaan waxbarasho kale oo qiimo leh.

## ERAYADA DABBAALDEG/XUSID

Buuga la yiraahdo «Xusidda ciidaha ee dugsiga xanaannada carruurta» waxa uu ka munaaqishoonayaa kala duwanaanshaha erayada dabbaaldeg iyo xusid.
« *Qawaaniinta caalamiga ah iyo kuwa Norweyjiguba waxa ay ka soo horjeedaan takoorka diimaha iyo dhaqamadaba. Carruunta waa in aan lagu dirqin in ay mowqif cad ka yeeshaan fahamka diinta iyo tilmaamaheeda. Dugsiga xannaanada caruurtu waa in ay ka feejignaadaan in aan ilmuhu dhibaato kala kulmin guriga iyo dugsiga xannaanada midkii uu raaci lahaa. Si ayaandarro noocaas ah looga hortago waxa fiican in la kala saaro erayada dabaaldeg iyo xusid.*
*Dabbaalldegga ciidaha waxa ku jira cibaadaysi iyo caadooyin la sameeyo oo ay tusaale ahaan qabanqaabiyaan culimada ama qoysku. Taas oo aan wax shaqo ah ku lahayn dugsiga xannaanada carruurta iyo Iskuulka Norweyjiga midna.*
*Xusidda ciidahu waxa ay taas kaga duwan tahay iyada oo la isugu yimaaddo xusidda in cidi – cidda ay doonto ha noqotee – xusayso xilli ciid ah.*» (Winje, 2010:27)

Marka dugsiga xannanda carruurtu xusayo xilli ciideed, waxaanu kulmin karnaa carruurta oo dhan iyada oo aan cidna la xumaynayn. Dugsiga xannaanadu kama shaqeeyo cibaadeysi iyo caadooyin diimeed oo qasab ah, laakiin waxa uu gudbiyaa aqoon ku saabsan waxyaabo muhiim ah oo la xiriira ciidda ama diinta markaas la xusayo.

Dugsiga xannaanada carruurtu waxa uu iyana abaabuli karaa dhaqdhaqaaqyo waxbarasho ku salaysan oo aan loo qaadan karin ficil diimeed, laakiin gudbinaya waxyaabo xuddun u ah dhaqanka iyo ciiddaha.
Tani waxa ay waafaqsan tahay qorshaha guud ee howlaha dugsiga xannaanada carruurta oo ina faraya: «*Dugsiga xannaanada carruurta waa in carruurta lagu baraa mabaadi'da ku qeexan diinta masiixiga iyo kuwa laga dhaxlay caadooyinka Aadamiga ah. Waxbarashada dhanka caqiidada qoyska ayaa mas'uul ka ah.*»

Waxaanu gudbinaa aqoon ku saabsan in siyaabo kala duwan oo loo fekero ama wax loo sameeyo. Qasdigayagu waa in aanu u shaqayno si xishamad leh oo carruurta badankooda u suurogelisa in ay ka qaybqaataan howlahaas, iyada oo aan cidna la fogeynayn. Sidaas-darteed waxaanu dhiirrigelinaa in carruurta oo dhami ka qaybqataan xusaskaas, inkasta oo aan qoysaskooda laga xusin maalintaas/ciiddaas iyada ah.
Waxaa aanu carruurta kala sheekaysanna in ay jiraan aragtiyo badan oo kala ged-geddisan, isla-markaana aynu aaminsan nahay waxyaabo kala duduwan. Jawaab go'an oo caqiidada saxa ah ama tan qaldan tilmaamaysa ma siino.

# QEYBTA 2: CAADOYINKA IYO CIIDAHA DUGSIYADA XANNAANADA CARRUURTA EE HORTEN

## LA SHAQEYNTA WAALIDIINTA

Waxyaabaha aanu dhaqamada iyo diimaha ka soo qaadanaynaa waa in ay waafaqsanaadaan waxyaabaha waalidiintu u qabaan in ay sax iyo muhiimba yihiin. Sidaas-darteed waa lagama-maar-maan in shaqaaluhu ay wada-hadal la yeeshaan qoys kasta, wadahadalkaas oo ku saabsan waxyaabaha ay qiimeeyaan ee la xiriira xuskaas. Ilmahu keligii kama mas'uul noqon karo dhaqankiisa, Sidaas-darteed waxaanu isku daynaa in aanu xoogga saarno tixgelinta guud iyo tan shaqsiyeedba.

## QAABKA LOO HOWLGELAYO

Haddaanu nahay dugsiga xannaanada carruurta siyaalo badan oo kala gedgeddisan ayaanu dhaqamada iyo diimaha wax uga dhihi karnaa. Waxaanu isticmaali karnaa sawirro, sheekooyin, heeso, muusiq, ciyaaro, cunto, qalab, filimo internet-ka laga keenay, farshaxan iwm. Waxa aanu xoogga saarnaa in fikirka iyo su'aalaha carruurta ay ka dhinac muuqdaan xaqaa'iqa iyo caadooyinka laga hadlayo. Carruurta ka soo jeedda dhaqanka iyo diinta laga hadlayo waxa fursad loo siinayaa in ay khibraddooda ka dhiibtaan, iyada oo waalidiintana lala kaashanayo.

Marka mowduuca diiniga ah laga hadlayo xilliyada ciidaha la xusayo, waxaannu xoogga saari doonnaa aragtida diimaha carruurta haystaan. Waxaanu doonaynaa sheekaysi ay ku dheehan tahay is-aaminaad, naxariis iyo is-xushmayn. Taas oo aannu rajeynayno in ay noqoto sida uu sheegay Winje: «*Xuska ciidaha ee dugsiga xannaanada carruurtu guud ahaan kuma saabsana ehluddiinimada carruurta, laakiin waxa uu ku saabsan yahay in lagu gaaro isku soo dhowaansho iyo xushmad iyo sinnaan.*» (Winje, 2010:23)

Inta lagu jiro sannaddugsiyeedka xannaanada carruurta waxaanu yeelanaa xusas door ah kuwaas oo aanu taariikhdooda wax yar ka sheegi doono. Kuwa hoos ku qarani ma soo wada koobayaan xusaska oo dhan, laakiin waxa ay tusayaan qaar ka mid ah ciidaha laga xusay ama badanaa laga xuso dugsiyada xannaanada carruurta ee Horten. Dugsi waliba waxa uu leeyahay caadooyin iyo xusas sannadle ah, kuwaas oo isbed-beddeli kara sannad kasta, maxaa yeelay carruurta dugsiga dhigata iyo dhaqammada ay haystaan ayaan isku mid ahayd sannad walba. Maadaama laga duulayo in nuxurka xuskaasi ugu muuqdo waalidiinta mid qiimo u leh caadooyinkooda, lagama-maar-maan ayay noqon kartaa in wax laga beddelo sannadaha qaar, inkasta oo qeybihiisa waaweynu isku mid yihiin. Sida caadooyinka iyo ciidaha loo xusayo, waxa aad xog faah-faahsan ka helaysaan qorshe sannadeedka iyo kan billaha ah/ qorshaha muddeysan ee u gaarka ah dugsiga xannaanada ilmahaagu dhigto.

Dhaqan walba si gooni ah ayaa looga dabbaaldegaa. Haddana waxa jira waxyaalo sida badan la is kaga mid yahay: Guriga oo la nadiifiyo oo meel hagaagsan laga dhigo, hadyad la isa siiyo, dhar qurux badan oo lagu lebbisto iyo cunto macaan oo qoyska iyo asxaabta lala cuno ayaa ka mid ah.

## QAAR KA MID AH CIIDAHA IYO CAADOOYINKA

### MAALINTA DHALASHADA

Carruurta marka sannad u buuxsamo wax weyn ayay u tahay, annaguna maalintaas waanu ka xusnaa dugsiga xannaanada carruurta. Dugsi kastaa waxa uu leeyahay caadooyin u gaar ah oo la xiriira sida looga xuso maalmaha dhalashada.

### CIIDAHA FIDRIGA IYO UDXADA

Ramadaan waa magaca bisha muslimiintu soomaan inta qorraxdu soo jeeddo. Ramadaan waa bisha sagaalaad ee sannadka hijriyada, waqtiga ay ku beegan tahay sannad walba waa uu is bedelaa marka loo eego taariikhda Miilaadiga.

Munaasabadda lagu xuso in ay Ramadaan dhammaatay waxa lagu magacaabaa Ciidka Fidriga (Id). Markaas guriga waa la hagaajiyaa oo la nadiifiyaa, waxa booqasho isugu taga ehelka iyo asxaabta, cunto macaan ayaa la cunaa, hadyadna waa la isa siiyaa.



*Ciidulfitri iyo ciiduladha*

Ciidka weyn, Id ul-adxa, waxa uu ka dambeeyaa ciidka yar muddo dhan laba bilood iyo toban maalmood. Dugsiga xannaanada carruurta waa laga xusaa ciidka Fidriga gadaashiisa.

### MAALINTA QM



*Qaramada midoobay madlinteda*

Qaramada Midoobay waxa si rasmi ah loo asaasay 24kii Oktoobar 1945, si loo soo afjaro dagaalkii labaad ee dunida, isla markaana ay noqoto gole lagu wada hadlo. Maanta 193 waddan ayaa xubin ka ah ururka. Hadafka ururku waa in uu ka shaqeeyo nabadgelyada iyo ammaanka dunida isla markaana uu kobciyo xiriirro saaxiibtinimo (wikipedia). Dugsiyada xannaanada carruurtu siyaabo kala duwan ayay u xusaan maalinta qaramada midoobay, iyaga oo xoogga saaraya saaxiibtinimada, xal u hellidda khilaafaadka iyo wax wada qaybsiga. Qaarkood lacag ayay siyaalo kala duwan u ururiyaan ka dibna waxay u diraan dhul ay joogaan carruur baahi u qabta lacagtaas.

## DIVALI

Tani waa mid ka mid ah ciidaha ugu muhiimsan ee caqiidada Hindu-ga, taas oo ka dhaxaysa dadka caqiidadaa haysta intooda badan.Waxa loo dabbaaldegaa Oktoobar/Noovembar dhexdeeda, waana munaasabad sannad cusub iyo iftiinkiisa loogu dabbaaldego, iyada oo lagu xusayo samaanta ka guulaysata xumaha. Dadka qaarkiina waxay caabudaan Ilaahooda lagu magacaabo Lakshmi.

## CIIDKA MASIIXIGA (CHRISTMAS) IYO SOO DHOWEYNTIISA

Ciidka ugu weyn ee dhaqanka Norweyjiga, Christmas-ka, bisha Diisambar oo dhan ayaa lagu sharfaa. Carruurtu waxyaabo hadyado ah ayay sameeyaan, bur (daqiiq) ayay dubaan, heeshaha Christmast-ka ayay bartaan, waxana ay dhegaystaan sheekooyin Christmast-ka la xiriira oo kala duduwan. Taarikhii hore ee gaboobay Christmas-ka waxa loo dabbaaldegi jiray in uu yahay maalinta Jiilaalka bartamaha u ah. Mar dambe ayuu noqday Ciid masiixiya oo lagu xuso dhalashada Nebi-Ciise, inanka Ilaahay. Norway dadku geed ay aqalka dhex dhigtaan ayey qurxiyaan, cunto u gaar ah Christmas-ka ayay cunaan, hadyadona waa ay isa siiyaan. Maalinta Christmas-ku soo gelayo waxa loo dabbaaldegaa 24ka Diisambar. Christmas-ku waa ciid muhiim u ah xitaa dadka aan diinta masiixiga rumaysnayn. Christmas-ku, sida waqtigan xaadirka ah looga dabbaaldego Norway, waxa ku jira waxyaabo laga soo qaatay caqiidooyin kala jaad ah. Astaamaha ay ka mid yihiin xiddigo, wadnayaal, sawir- malagyo, shamaca soo dhoweynta Christmas-ka, maaskarada garka cad ku samaysan yahay ee wejiga la gashado iyo geedka Christmas-ka oo lug ku leh diinta Masiixiga, tan Yuhuudaba iyo kuwo kaleba.

## MAALINTA JIILAALKA

Maalintan waxa loogu talo galay in dibedda iyo barafka lagu ciyaaro. Bannaanka oo loo baxo iyo dibedda oo lagu ciyaaro waxay qeyb ka tahay dhaqanka Norweyjiga, iyo waxyaalaha qiimaha leh ee aanu doonayno in la barto. Waxaanu rabnaa in dibadda oo lagu ciyaaraa ay noqoto wax lagu farxo.



*Ciida masiixiga*



*Maalin xiliga barafka daajoah*

## KRYBBEVANDRING (CRIB WALK)

Carruurta da'doodu tahay saddex sano iyo wixii ka weyn waxa lagu marti qaadaa Kiniisadda si'ay u dhegeystaan sheekooyin ku saabsan dhalashadii Nebi-Ciise. Marka u dambaysana carruurta waxa ay ka qaybgalaan ciyaar la iska dhigayo xoolo-jirayaashii raadinayay markii Nebi-Ciise dhashay. Qol Kiniisadda ah waxa yaal bir iyo sanam dhererkoodu sax yahay oo lagu metelayo Yuusuf, Maryama iyo Nebi-Ciise markii uu dhashay. Carruurtu waxa kale oo ay arki doonaan hadyadihii Nebi-Ciise ay siiyeen boqorradu; Dahab iyo macaadiin kaleba.



## Maalinta Lucia

Maalinta Lucia asal ahaan waxa lagu xusaa gabar la oran jiray Lucia oo hoggaminay-say jahaadkii masiixiyadda ee 13kii Diisam-bar 300. Dugsiga xannaanada carruurtu waxay abaabulaan socodka Lucia, kaas oo ay carruurtu gacanta ku qaataan xiddigo iftiin ka baxayo ama shamac baxaya iyaga oo dhar cad gashan isla markaana ku hee-saya heesta Lucia. Socodka ka dib waxa la cunaa «lussekatter», nooc rooti ah oo laga sameeyey bur la qamiiriyay.

## MAALINTA QOWMIYADDA SAAMMAHA EE 6DA FEBRAAYO

Maalinta qaranimada Saammuhu ma da'weyna, waxana maalintan lagu go'aamiyey shirkii Saammaha ee 1992. Maalintani waxay ka dhaxaysaa qowmiyadda Saammaha oo dhan Norway, Finland, Sweden iyo Ruushka, waana maalin calanka laga saaro Norway. Dugsiyada xannaanada carruurta iyo Iskuulada Norway waxa badanaa laga sameeyaa mashaariic ama mowduucyo ku taxaluqa qowmiyadda Saammaha kuwaas oo lagu beego xilliyada ku dhow-dhow maalinta qaranimada Saamaha, waxa beryahan dambe caadi noqonaysa in la xuso maalinta qaranimada Saammaha lafteeda.



*Maalinta qowmiyada saamaha*

## NAYRUUSHKA 21KA MAARSO

Kani waa dhalashada sannadka cusub ee Kurdida, kaas oo ay xilliga gu'ga ku soo dhaweeyaan. Nayruushka waxa looga dabbaaldegaa waddamada Iiraan, Aserbajaan, Afghanistan, Kaukasus, Tadsjikistan, Kurdistan, Woqooyiga Hindiya iyo weliba Bahá'íer. Dabbaaldeggani waxa uu ka soo jeedaa kumannaan sano ka hor waxana lagu qoray diiwaanka UNESCO ee waxyaalaha in la xafido u baahan.

Dadka qaraabada ah iyo asxaabta oo is booqda iyo in cunto macaan la wada cuno, waxay qeyb muhiim ah ka yihiin munaasibadda Nayruushka. Dhulka Kurdida Nayruushku waxa uu ka bilaabmaa 21ka Maarso dabbaaldegguna waxa uu socdaa saddex iyo toban maalmood. Maalinta Nayruushka ugu danbeysa qoysasku waxay aadaan xadiiqadaha iyo dhulka dibedaha ah si ay ugu dabbaldegaan bilawga gu'ga iyo Nayruushka geba-gebadiisa.



## KAARNEFAAL



Kaarnefaalku waxa uu asal ahaan ka soo jeedaa xilli-diimeedka Easter-ka iyo soonka masiixiga, Sidaas-darteed waxa caado ahaan looga dabbaaldegaa waddamada diinta masiixiga qaatay. Kaarnefaalku waxa uu xoog ku lahaa dadka Roman-Kaatooliga ah, laakiin waxa iyana u dabbaaldega waddamo mahdabo kale oo masiixiya haysta sida Orthodox-ka iyo Protestant-ka. Waa munaasabad la jecel yahay oo aan laga helayn jadwal-sannadeedka ciidaha kiniisadda iyo kuwa kale ee calmaaniga ah midna. Kaarnefaalka waxaa ku jira cibaadeysi kala duduwan laga bilaabo muddada ka horreysa inta aan cuntada laga soomin, 40 maalmood ka hor maalinta Easter-ku 1da yahay. Waxa ka mid ah socod wadareed oo kiniisadda ah, lebis gaar ah, muusiq, ciyaaro iyo dabbaaldeg gudaha kiniisadda iyo dibeddeba ah. In kasta oo si kala ged-geddisan looga sameeyo dalalka laga xuso, haddana Kaarnefaalka had iyo goor waxa ku jira ciyaaro iyo lebbis gaar ah.

## SANNADKA CUSUB EE SHIINAHA IYO VIYATNAM

Shiinaha iyo Viyatnamba waxay u dabbaaldegaan sannadkooda cusub dhammaadka bisha Jannaayo ama bilowga bisha Febraayo. Caadooyinka dabbaaldegga sannadka dhalashadiisa la xiriira ee labada waddan waa isu egyihiin, laakiin meelo ayay ku kala duwan yihiin. Waxay iskaga mid yihiin in guriga la nadiifiyo, dhar cusub la iibsado iyo cunto sannadka cusub u gaar ah la samaysto. Guriga waxa lagu qurxiyaa ubax, inta badan midab hurdi ah, carruurtana waalidkood ayaa hadyado lacageed ugu rida bashqad guduudan. Midabada loo isticmaalo dabbaaldegga sanandka cusub waa Hurdi, guduud iyo dahabi.

## XILLI DIIMEEDKA EASTER-KA



*Xilli diimeedka easter-ka*

Nuxurka diimeed ee ku jira Easter-ku waa in Nebi-Ciise ku geeriyooday alwaaxii iskutilaabta ahaa ee lagu dhidbay, laakiin uu ka sare kacay markii dambe. Arrintan aad loogama warramo marka la joogo dugsiga xannanada carruurta, laakiin Kiniisaddu waxay fidisaa martiqaad arrintan la xiriira oo lagu magacaabo socodka Easter-ka (eeg mowduuca hoose «påskevandring»). Dugsiga xannaanada carruurta marka la joogo waxaanu xooga saarnaa ka hadalka xilliga gu'ga iyo nolosha cusub ee la dhalata. Waxaanu samaynaa waxyaalo sharraxaad iyo qurxin ah, annaga oo isticmaalayna midabada Easter-ka ee hurdiga (jaalle) iyo cagaarka, tusaale ahaan ukunta Easter-ka. Carruurta qaarkood wax bay irbad ku tolaan qaar kalena waxay soo gurtaan geedaha yar-yar ee iniinyaha cusub leh.

## Socodka Easter-ka (påskevandring)



*Socodka easter-ka*

Kiniisaddu waxay martiqaad u fidisaa carruurta da'doodu u dhaxayso 4-5 sano si'ay wax uga ogaadaan waxyaalihii Nebi-Ciise sameeyey intii uu qaangaarka ahaa iyo wixii dhacay Easter-ka. In Nebi-Ciise dhintay isaga oo alwaax iskutibaal ah lagu dhidbay aad loogama hadlo, laakiin waxa inta badan laga hadli doonaa in uu sarekacay. Farriintaas waxa lagu gubinayaa sawirro iftiin leh iyo sawir gacmeedyo. Intaas wax dheer iyada oo shaqaalaha Kiniisaddu carruurta tusayaan sida uu Nebi-Ciise lugaha u dhaqi jiray khulafadiisa (culimada uu wax baray) marka ay cuntada u dambaysa isaga la cunaan. Ugu dambaynta waxaynu ku daadegi doonaa qolka la dhigo «julekrybben» oo ah Aalad meeshii Nebi-Ciise ku jiray lagu metelayo, markan carruurtu waxay arki doonaa sida ay u ekaan lahayd qabuurta madhan ee Nebi-Ciise. Carruurta waxa la tusi doonaa wax leh qaabka hoggii buurta ee dhagaxu ka soo dumay iyo sanam sidii malag oo kale loogu lebbisay.

## Quraacda Easter-ka

Qoyska ilmaha dhalay ayaa lagu soo martiqaadaa in ay quraac ku cunaan dugsiga xannaanada carruurta, taas oo ay ku jiraan ukun iyo waxyaabo kale oo rootiga la marsado oo hurdi ah.

## Cunto diimeed (Duco)

Dadka rumaysan mahdabta loo yaqaan «*Jehovas vitner*» waxa ay xilli-diimeedka Easter-ka sameeyaan Duco (Cunto diimeed), taas oo u dhiganta cuntada ay dadka masiixiga ahi cunaan ee loo yaqaan «*nattverd*», maadaama uu Nebi Ciise sunne ka dhigay cuntadaas la samaysto xilliga Easter-ka. Haddii ay carruur haysata mahdabta «*Jehovas vitner*» dugsiga xannaanada ku jiraan, waa wanaagsan tahay in wax laga yiraahdo Ducadaas si markaas wax looga fahmo caqiidadooda.

## CIBAADEYSIGA DUGSIGA XANNAANADA CARRUURTA EE LA XIRIIRTA XILLI-DIIMEEDKA PINSE-HA

Carruurta sannadwalba Iskuulka bilaabaysa waxa lagu martiqaadaa kulan cibaadaysi oo ka dhaca kiniisadda Horten kaas oo la xiriira xilli-diimeedka pinse-ha. Ujeedada ugu muhiimsan ee laga leeyahay waa in pinse-hu u taagan yahay dhalashadii kiniisadda, heeso badan ayaana la qaadaa inta lagu jiro cibaadeysigaas. Carruurtu waxa ay dugsiga xannaanada ku sii samaystaan ubaxyo ama sanam qaab shimbireed leh, kuwaas oo ay qurxin uga dhigaan kiniisadda marka ay halkaas tagaan.

## BANNAANBAXA CARRUURTA

Maalinta shaqo ee ugu dambaysa maalmaha ka horreeya 17ka bisha May, waxa carruurta oo dhan lagu martiqaadaa in ay socod ku soo maraan bartamaha Horten si loo xuso maalinta qaranimada Norway.



*Children's parade*

## XAFLADDA XAGAAGA

Waalidiinta carruurta waxa goor gal-ab ah lagu martiqaadaa xaflad lagu soo gebogebaynayo sannaddugsiyeedka xannaanada carruurta. Carruurta ayaa medadaalooyin soo bandhigta, cunto iyo sharaabna waxa lagu cunaa barxadda dibedda ee dugsiga xannaanada carruurta.

**XIGASHO**

Lov om barnehager, 2006
Kunnskapsdepartementet: Rammeplan for barnehagens innhold og oppgaver, 2011
Winje, Geir: Høytidsmarkering i barnehagen, Høyskoleforlaget, 2010
Wikipedia

mammut reklame 61 28 28 20